



Ilaalinta Bulshooyinka Dugsiyadeena: Dugsiyada Dadweynaha Portland inay shardi kaga dhigaan Tallaalka COVID-19 dhammaan Shaqaalaha

Ogosto 18, 2021

Saaxiibada sharafta leh,

Tilmaamaha caafimaadka dadweynaha waa cad yihiin--tallaalada ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo faafitaanka iyo darnaanta COVID. Maanta waxaanu ku dhawaaqaynaa shuruud kaga dhigidda tallaalka COVID-19 dhammaan shaqaalaha PPS.

Inta lagu jiro aafada COVID-19, waxaan raacaynay tilmaamaha khubarada caafimaadka dadweynaha si sida ugu fiican loogu hubiyo caafimaadka iyo fayoobaanta ardaydeena iyo xubnaha shaqaalaha. Gobolka Oregon wuxuu ku wargeliyay in degmo dugsiyeedyada maxalliga ah ay joogaan meesha ugu fiican ee ay go'aamin karaan tallaabooyin dheeri ah oo looga hortagayo faafitaanka COVID-19. Iyadoo la waafajinayo talooyinka khubarada caafimaadka dadweynaha, Dugsiyada Dadweynaha Portland, oo ay weheliyaan saaxiibadeeda shaqaalaha, waxaa ka go'an inay qaadaan tallaabo kasta oo suurtoagal ah si loo hubiyo caafimaadka iyo badbaadada ardaydeenna, shaqaalaha, iyo bulshada.

Maanta, maaddaama aynu isu diyaarinayno inaynu ku soo dhaweyno ardayda ku soo laabashada dugsiya waxbaridda fool-ka-foolka ah Sibtambar 1, PPS, Ururka Macallimiinta Portland (PAT) iyo Xiriirka Xirfadlayaasha Dugsiyada Portland (PFSP) waxay ku heshiiyeen nuxurka ah inaanu shardi kaga dhigno dhammaan shaqaalaha — oo ay ku jiraan macallimiinta fasalka, shaqaalaha dugsiya iyo shaqaalaha xafiiska dhexe — in laga tallaalo COVID-19.

PPS iyo saaxiibadeeda ururka shaqaalaha ayaa iftiiminaya faahfaahinta shardiga tallaalkan sannad dugsiyeedka 2021-2022. Macluumaad dheeraad ah ayay heli doonaan dhammaan shaqaalaha PPS ugu dambayn Isniinta, Ogosto 23.

Marka la soo koobo, dhammaan shaqaalaha PPS waxaa laga rabaa inay soo gudbiyaan caddaynta tallaalka oo buuxa Ogosto 31, haddii aysan haysan ka reebitaan la oggolaaday. Shaqaalaha PPS ee aan keenin caddaynta tallaalka marka la gaaro Ogosto 31 waxaa laga rabaa in si joogto ah loo baaro, ama ilaa uu soo gudbiyo caddaynta tallaalka.

Ballan-qaadkan la wadaago iyo ku-dhawaaqidda ah in shardi looga dhigo tallaalka COVID-19 dhammaan shaqaalaha PPS waa hab kale oo muhiim ah, badbaado leh oo wax-ku-ool ah oo lagu ilaalinayo ardaydeena, shaqaalaha iyo bulshada iyo xagga yoolkeena aynu ku soo afjarayno masiibadan. Si aad wax uga ogaato dadaalada PPS ee ah inay abuuraan helitaanka iyo kor u qaadista tallaalka COVID-19, booqo [PPS.net/COVID-19Vaccination](https://pps.net/COVID-19Vaccination). Iyada oo lala kaashanayo Bandhigga Diiwaangelinta Furan ee OEBC, tallaallada COVID waxaa heli doona dhammaan shaqaalaha, xubnaha qoyskooda (carruurta da'doodu tahay 12+) iyo saaxiibada maanta laga bilaabo 3:30 ilaa 5:30 g.d. Qolka Guddiga BESS.

Mahadsanid,

Sharon Reese
Madaxa Shaqaalaha